

# DHISIDDA ISKAASHIGA QOYSKA IYO MACALLINKA

Dhaqamada ugu Fiican ee Qoysaska Isticmaala TalkingPoints

---

Xidhiidh wax ku ool ah oo lala yeesho macalimiinta ilmahaaga ayaa muhiim u ah taageeridda waxbarashadooda iyo kobcinta jawi waxbarasho oo togan. Halkan waxaa ah shanta dhaqan ee ugu wanaagsan, oo ay ku dhammaystiran yihiin tusaalooyin, si ay kaaga caawiyaan inaad si macno leh oo wax-ku-ool ah ula falgasho barayaasha ilmahaaga.

## **Ahow Qof Firfircoon**

La xidhiidh macalimiinta ilmahaaga horraanta sannad-dugsiyeedka si aad isku barto oo aad u samaysato khad isgaarsiineed. Ha ogaadaan inay kaa go'an tahay inaad taageerto waxbarashada ilmahaaga. Tusaale ahaan, waxaad ku bilaabi kartaa fariinta: "Salaan (Magaca Macallinka), waxaan ahay (Magacaaga), waalidka (Magaca Ardayga). Waxaan rabay inaan iskaa baro oo muujiyo rabitaankayga inaan taageero (Magaca Ardayga) sannad dugsiyeedka oo dhan."

## **Ahow Qof Wanaagsan oo Xushmad leh**

Joogtee hab wanaagsan oo ixtiraam dhammaan xidhiidhadaada. Xiriir wanaagsan oo lala yeesho macalimiinta waxay ku dhisan tahay ixtiraam iyo isfaham labada dhinac ah. Tusaale ahaan, waxaad farriin ku bilaabi kartaa: "Waad ku mahadsan tahay dhammaan shaqadaada adag ee aad u samaysay (Magaca Ardayga). Waan ka mahadcelinayaa wax kasta oo aad sameyso si aad ugu taageerto waxbarashadooda."

## **Si Gaar ah u Qeex**

Markaad qabto su'aalo ama walaac, si gaar ah u qeex arrimaha. Bixinta macluumaad faahfaahsan waxay ka caawisaa macalimiinta inay fahmaan oo ay si wax ku ool ah wax uga qabtaan walaacyadaada. Tusaale ahaan, waxaad odhan kartaa: "Waxaan ogaaday in [Magaca Ardayga] ay ku dhibaatoonayeen shaqa-guriyeedkooda xisaabta dhawaanahan. Ma siin kartaa xoogaa agabyo dheeraad ah ama ma soo jeedin kartaa hababka aan uga caawin karno inay ku horumarayaan marka ay guriga joogaan?"

## **Wadaag Macluumaadka Muhiimka Ah**

Ka dhig macalimiinta kuwo la socdo wax kasta oo ku saabsan isbedel kasta ama dhacdooyinka nolasha ilmahaaga ee laga yaabo inay saameeyso dabeecadooda ama waxqabadkooda dugsiga. Macluumaadkani waxa uu ka caawiyaa macalimiinta inay siiyaan taageero wanaagsan. Waxaad ku bilaabi kartaa fariin sida: "Waxaan rabay inaan ku ogeysiyo in (Magaca Ardayga) ku haysato wakhti adag oo isbeddel wayn ah guriga, waxayna saameyn kartaa diirad saaridooda fasalka. Fadlan isha ku hay iyaga oo ii soo sheeg haddii aad wax dareento."

## **Dabagal**

Ka dib marka aad kala hadasho walaac ama arin macalin, dabagal ku samee si aad u aragto sida ay wax u horumarayaan. Tani waxay muujinaysaa inaad ku hawlan tahay oo waxay kaa caawinaysaa hubinta in ficilo kasta oo lagu heshiiyey la dhaqangeliyay. Waxaad ku bilaabi kartaa fariin dabagal ah: "Salaan (Magaca Macallinka), waxaan rabay in aan hubiyo arin la xidhiidha horumarka (Magaca Ardayga) ee arrintii aan ka wada hadalnay usbuucii la soo dhaafay. Ma dareentay wax horumar ah ama isbeddel ah?"